UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office of the Humanitarian Coordinator for Somalia

Codsiga Gargaarka Bani'aadamnimada ee 2009 ee Soomaaliya ayaa laga soo saarey Nayroobi

Nayroobi, 1 Desembar 2008: Codsiga gargaarka bani'aadamnimada ee Soomaaliya ayaa waxaa maanta Nayroobi ka soo saarey Isku-duwaha Arrimaha Bani'aadamnimada iyo Madaxa Qaramada Midoobey ee Soomaaliya Mark Bowden. Codsiga sanadkan waxa lagu doonayaa US$918,844,549 oo loogu baahan yahay 200 mashruuc oo ay soo diyaariyeen 14 Hay'adood oo Qaramada Midoobey ah, 32 NGO caalami ah iyo 39 NGO Somali ah.

Kororka xaddiga iyo maaliyadda ee codsiga Soomaaliya uu ka kordhay US662 milyan oo uu ahaa sanadkii 2008 iyo ku dhowaad US$919 milyan oo uu sanadka 2009 yahay ma muujinayo oo keliya tirada aadka u badatey ee dadka gargaarka u baahan ee waxa ay muujineysaa kororka saa'idka ah ee uu kordhey qiimaha badeecooyinka iyo kharashka lagu gaarsiinayo Soomaaliya. Sahamadii ugu dambeeyey ee ay sameysay Qaybta Lafagurka Ka-haqab-beelka/helidda Cuntada ee Qaramada Midoobey ayaa xaqiijinaya sii jiritaanka dhibaatooyinka bani'aadamnimada gaar ahaan ay ka sii jiraan bartamaha Soomaaliya halkaas oo heerarka nafaqo-xumada ba'ani ay gaareyso ku dhowaad 6%, iyo baahida loo qabo waxqabad degdeg ah si loo badbaadiyo nafaha iyo hababka nolol-raadsashada dadka.

"Waxa ina hor yaalla maanta waa xaalad ay kalabar dadku ay haysto dhibaatooyin amaba ay u baahan yihiin gargaar. Shaki kuma jiro in dhibaatooyinka ay gaareen heer weyn oo aan la dafiri karin," ayuu yiri Isku-duwaha iyo Madaxa Qaramada Midoobey ee Somalia, Mr. Mark Bowden. "Su'aali kama taagna in sanadkii 2008, hawlgallada bani'aadamnimadu ay la daala-dhacayeen wax ka qabashada dhibaatooyinka sii ballaaranayey iyo gacan siinta dadka tabaaleysan ee tiradoo du ay sii badaneyso kuna sugan meelo ay adagtahay in hay,adaha gargaarku ay wax ka qabtaan. Haseyeeshee guud ahaan waxa ay ku guuleysteen – helidda wixii loo baahnaa, geynta halkii looga baahnaa iyo waqtigii loo baahnaa. Ka sokow waxqabad wadajira oo ku aaddan caafimaadka, nafaqeynta, biyaha iyo fayadhowrka oo laga lahaa ujeeddooyin degdeg loogu badbaadinayo nafaha, taageerada nolol-raadsiga oo barbar-socota ayaa iyana si degdeg ah loogu baahan yahay si looga hortago in qoysasku ay ku dhacaan saboolnimo aan laga soo kaban karin iyada oo la eegayo cuntada oo qaali noqotey, burburka hantida iyo helid la'aanta cuntada. Waa aan awoodnaa, ee waa in aan arrintaan sameynaa sanadka 2009."

Dhibaatooyinka bani'aadamnimada ayaa sanadka 2008 gaarey halkii ugu xumayd. Deganaan la'aanta iyo iskahor-imaadyada joogtada ah, dhibaatooyinka dhaqaale iyo abaarta daba-dheeraatey ayaa keeney in ay si degdeg ah uga sii daraan xaaladaha bani'aadamnimada iyo in ay si degdeg ah u badato nugeylka dadka Soomaalida ah. Dadka Soomaaliya ee gargaarka u baahan waxaa lagu qiyaasey 3.2 milyan oo qof, oo ka dhigan 40% wadarta dadweynaha. Qiyaastii mid ka mid ah lixdii carruur ah ee ku nool Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya ayaa ay hadda haysaa nafaqo-xumo ba'an.

Hadalkii ay ka soo jeedisey markii la soo saarayey codsiga, Agaasime goboleedka Bariga iyo koonfurta ee UNICEFf Per Engebak waxa ay bulshada caalamka ugu baaqdey in ay sii wadaan gargaarka ay siiyaan dadka Soomaaliyeed. "Soomaalida waa in aan si laba-laab ah loogu ciqaabin iska-hor-imaadyada ka jira dalkooda. In-kasta oo xaaladda nabadgelyadu ay xun tahay haddana waa in aan gargaarka bixinnaa. In kasta oo ay adag tahay, haddana ma ahan mid aan suurtagal ahayn in si taabogal ah wax looga qabto xaaladda bani'aadamnimada. Maaliyaddan ayaa muhiimad ballaaran u leh sidii Hay'adaha Qaramada Midoobey iyo la-hawlgalayaashooda ay si taabogal ah wax ugu qaban lahaayeen 300,000 oo carruur nafaqo-xumo ay hayso ah sanad kasta; iyo si aan u gaarno 65% carruurta aan laga tallaalin cudurada laga hortegi karo; iyo in aan dugsiyo (iskuullo) si nabadgelyo ah wax loogu baran karo u siino carruurta dhexda u galay xabadda iska-hor-imaadyo aaney iyagu abuurin."

Codsiga bani'aadamnimada ee 2008 (2008 CAP) ee Soomaaliya ayaa ilaa 1dii Disembar 2008 heley 70% maaliyaddii uu u baahnaa. Haseyeeshee, waxaa jirta in waaxaha ay ku kala duwan yihiin heerarka

miisaaniyadaha ay heleen. Qaar ka mid ah waaxaha ugu muhiimsan sida bed-qabka & nabadgelyada shaqaalaha (8%), beeraha iyo nolol-raadsiga (24%), caafimaadka (40%), waxbarashada (42%) iyo ilaalinta xuquuqda (42%), ayaa u baahan in si degdeg ah dhug loogu yeesho haddii la doonayo in bulshada bani'aadamnimadu ay si wadajir ah wax uga qabato oo ay hawlgalladana hoos uga dhicin heerka ay hadda joogaan.

Codsiga Wadajira ee Caalamiga ah ayaa laga soo saarey Jineefa 19kii Nofembar. Ilaa $7 bilyan ayaa si wadajir ah ay hay'adaha gargaarku u doonayaan si ay wax uga qabtaan badi baahiyaha ugu daran ee haysta 30 milyan oo qof oo ku nool Jamhuuriyadda Bartamaha Afrika, Chad, Côte d'Ivoire, Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ah ee Kongo Ciraaq, Kenya, dhulka reer Falastiin ee la haysto, Suudaan, Uganda, Galbeedka Afrika, iyo Zimbabwe iyo sidoo kale Soomaaliya.

Faahfaahin dheeri ah, fadlan kala soo xiriir: Dawn Elizabeth Blalock, OCHA Somalia, +254-734-210-102 blalock@un.org ama Rita Maingi, +254 734 800 120 email: maingir@un.org. war-saxaafadeedyada OCHA Somalia waxaa laga helayaa http://ochaonline.un.org/somalia